



## Buugga Siyaasadda iyo Nidaamka Booliska ee Waaxda Booliska Minneapolis

Tiro:  
9-100

### Cadadka 9aad – Siyaasadaha Dhaqangelinta

#### Xariga Dadka Waaweyn

##### 9-101.01    **Shuruudaha macluumaadka guud ee warbixinta Xariga danbiga iyo Xadgudubka - Sababta macquulka ah ee Garsoorka** (05/29/02)

(A-B)

Xarigga dambiga culus iyo dembiga weyn, xeerarka soo socda ayaa lagu dabaqayaa:

Lifaaqa (0) ee shaashadda gellinta xogta CAPRS, qoraal deg-deg ah oo horay loo qoray oo cinwaankeedu yahay "Macluumaadka Dadweynaha" ayaa soo baxaya. Qaraalakan ka dib, saraakiishu waa inay si kooban u faahfaahiyaan dhacdo/xarig. Lama gellin karo magacyo, cinwaano ama macluumaad kasta oo tilmaamaya dhibbanaha ama markhaatiga laguma gellin qaybtan warbixinta.

Dadajinta xigta waa bayaanka Dhaarta Sababta macquulka ah ee Garsoorka. Isla markiiba ka dib, saraakiishu waa inay qoraan ku dhawaad hal ilaa laba cutub oo faahfaahinaya sababta suurtagalka ah ee xadhiga.

Lifaaqa koowaad (1) ee warbixinta CAPRS waa inay si faahfaahsan u qeexdaa dhacdada oo dhan.

Kiisaska xadhig ku salaysan wargelinta sabab macquul ah (PC Pick-up), saraakiishu waa inay ku lifaaqaan soo-qaadista sababta macquul ah warbixinta CAPRS. Nuquallada soo-qaadista sabab macquul ah (PC) waxaa laga heli karaa faylka Qoraalka unugga ama MPD Net.

Kadib dhaarta qoraal ama afka ah, saraakiisha nabada waxay saxiixi karaan warbixin qoraal ah oo sarkaal kale ujeedaduna tahay bixinta sababta macquulka ah ee xadhiga.

Saraakiishu waa inay ku dhaartaan oo ku saxeexaan qoraalkooda Sababta macquulka ah ee Garsoorka hortiisa nootaayo MPD ah., saraakiisha nabada waxay saxiixi karaan warbixin qoraal ah oo sarkaal kale ujeedaduna tahay bixinta sababta macquulka ah ee xadhiga.

Nootaayooyinka MPD waa inay markhaati ka noqdaan dhaarinta iyo saxeexa, ka dib, waa inay saxeexaan bayaanka saxeexooda, nambarkooda laysinka, iyo taariikhda laysankoodu dhacayo.

Sarkaalka sare ee xidhaya ayaa mas'uul ka ah hubinta dhammaan bayaannada Sababaha suurtogalka ah in la nootaayo.

Shaqaalahaa qaybta qoraalka waa inay u qaybiyaan qoraalada saxeexan iyo kuwa lagu dhaariyay qaybta taariikhda dembiyada inta lagu jiro Sabtida iyo Axadda iyo saacadaha fasaxa iyo waaxyaha baadhista inta lagu jiro saacadaha shaqada ee caadiga ah.

**Error! Reference source not found.**

9-100

**Error! Reference source not found.**

Page 2 of 2

Shaqaalaha Taariikhda Dambiyada waa in ay buuxiyaan foomka maxkamadda oo ay ku lifaaqaan warbixinta xiritaanka.

Siyaasadani waxay sidoo kale khusaysaa xadhiga dambiyada dhalinyarada iyo xadhigga dambiyada culus.